

Booliska Finland (Suomen poliisi)

Finland gudeheeda shaqada boolisku waa inuu ilaaliyo sidii loo dhowri lahaa nidaamka iyo cadaaladda bulshada, iyo inuu ilaaliyo in aan lagu xad gudbin nidaamka guud iyo nabadgelyada, iyo weliba inuu dembiyada ka hortago, inuu dembiyada baaro iyo inuu dembiyada u gudbiyo xeerilaaliyaha si uu uga fekerro. Boolisku wuxuu kaloo u xilsaaran yahay maamulidda hawlo badan oo ogolaashooyin nabadgelyada la xiriira ah.



Boolisku wuu adeegaa

Finland waxaa ku yaalla 24 saldhig boolis, oo isugeyn ahaan leh qiyaastii 180 laamood oo dadka u adeega. Saldhigyada booliska qaar ka mid ah baan afar iyo labaatanka saac oo dhan la joogin.

Booliska deegaanku (Paikallispoliisi) wuxuu u xilsaaran yahay deegaanka uu qaabilsan yahay nabadgelyadiisa iyo nidaamkiisa, ilaalinta gaadiidka, baarista dembiyada iyo weliba adeegyada ogolaanshooyinka ah. Waxaa kaloo jira meelo badan oo ah meelaha adeegyada guud (yhteispalvelupiste) oo laga helo adeegyada ogolaanshayaasha booliska (poliisin lupapalvelu).





112 lambarka guud ee caawimada degdegga ah

Markaad u baahan tahay caawimo degdeg ah, waxaad wacdaa 112 oo ah lambarka guud ee caawimooyinka degdegga ah.

Markaad lambarkan wacayso uma baahnid lambarka furaha magaalada, xitaa markaad telefoonka gacanta ka wacayso. Lambarka caawimada degdegga ah markaad wacayso telefoon walba si lacag la'aan ah baad uga wici kartaa.



Dembibaarista

Baaritaanka hore ee dembiyada waxaa sida caadiga ah u xilsaaran saldhigga booliska ee qaabilsan meesha dembigu ka dhacay. Marka dembi laga soo dacwoonayo, dacwada waxaa loo gudbin karaa boolis walba. Saldhiga booliska ee dacwada loo soo gudbiyey ayaa dacwada u sii gudbinaya qolada u xilsaaran.

Hadday jirto sabab keeneysa in laga shakiyo in dembi dhacay, boolisku wuxuu bilaabaa dembiga baaritaankiisa hore. Dacwooyinka la soo gudbiyo oo dhan ma keenaan in dembibaaris la sameeyo.



Nidaamka guud iyo nadabgelyada

Booliska ayaa u xilsaaran in la ilaaliyo nidaamka iyo nabadgelyada meelaha guud. Boolisku wuu wareegaa, wuxuuna qabtaa hawlaha u baahan in si degdeg ah wax looga qabto, wuxuuna ilaaliyaa nidaamka nabadgelyada ee meelaha dadku isugu yimaadaan ee dhacdooyinka waaweyn ka jiraan. Boolisku dadka wuxuu siiyaa talooyin iyo tilmaamo, haddii sharciga lagu xadgudbana waxbuu ka qabtaa.



Ilaalinta gaadiidka

Ilaalinta gaadiidka ee booliska waxaa xoog la saaraa ilaalinta xawaaraha gaadiidku ku socdo, ilaalinta in waxyaabaha maanka dooriya la isticimaalay iyo in qalabka nabadgelyada ee gaadiidka la isticimaalo, iyo weliba in la ilaaliyo darawallada khatarta keeni kara. Booliska shaqooyinkiisa waxaa kaloo ka mid ah inuu wax ka qabto waxyaabaha kale ee keenaya in la jebiyo sharciyada wadooyinka.

Booliska deegaanku wuxuu sida caadiga ah ilaaliyaa gaadiidka maraya meelaha la deggan yahay, booliska wadooyinkuna (liikkuva poliisi) wuxuu ugu horayn ilaaliyaa gaadiidka maraya wadooyinka waaweyn ee magaalooyinka bannaankooda ah.



Adeegyada ogolaanshooyinka (Lupapalvelut)

Booliska deegaanka ayaa u xilsaaran adeegyada waxyaabaha ogolaanshaha ah ee dadka deggan meelaha u qaabilsan yahay soo codsadaan. Adeegyada ogolaanshaha ah ee boolisku qaabilsan yahay waxaa kaloo laga helaa meelo badan oo ka mid ah meelaha adeegyada guud (yhteispalvelupiste). Noocyada ogolaanshaha ah ee boolisku bixiyo badankoodu waa baasaboorada, kaadhahka aqoonsiga (henkilökortti), laysanka wadidda gaadiidka, sharciyada dadka ajnebiga ah la siiyo iyo ogolaanshaha hubka la rido (ampuma-aselupa). Marka loo baahan yahay waxyaabahan kor lagu soo sheegay, waxaa loo baahan yahay in ugu yaraan hal mar la tago saldhigga booliska ama meesha adeegyada guud, si qofka codsiga samaynaya loo habsado. Waxyaabaha ogolaanshaha ahi waa lacag.

Marka iyadoo la joogo waddan kale la soo codsanayo sharciga deggenaanshaha ee Finland iyo sharciga shaqada iyo fiisaha, codsiyada waxaa la geeyaa safaaradda Finland.



Alaabta la helay

Alaabta la helay waa in loo sheegaan qofka iska leh ama waa in loo geeyaa booliska. Waxyaabaha keensashadoodu ama haysashadoodu mabnuuca tahay ama u baahan in ogolaansho laga haysto maamulka dowladda, tusaale ahaan sida daroogada, khamri sharci daro ah ama hub sharci daro ah, waa in isla markiiba loo gudbiyaa booliska.

Qofka iska leh alaabta la helay wuxuu xaq u leeyahay in alaabtiisa la siiyo, haddii uu qofka alaabta helay siiyo abaalmarinta helitaanka, oo uu magdhebo kharashka ku baxay alaabta helitaankeeda.





Faahfaahin dheeraad ah

www.poliisi.fi

www.polis.fi

www.police.fi

